# Koorsada 1aad. Kulanka casharka 1aad. Jilayaasha Socodka Awooda.

Dooro 6 ilaa 10 jilayaal oo ku saleysan xaalada guud iyo tirada kaqeybgalayaasha. Daabac sharaxaadda jile kasta seddex ilaa afar jeer iyadoo lagu saleynayo tirada laga filayo kaqeybgalayaasha koox kasta



Khadiija waa hooyo aan la qabin oo haysata sideed caruur ah. Waxay dhawaan ka carartay dagaalada udhaxeeya mujaahidiinta alshabaab iyo ciidamada dowlada soomaaliya. Asxaabteeda ayaa ku toosiyey xero aan rasmi ahayn oo si kumeelgaar ah loo degay halkaas oo uu u qoondeeyey maareeyaha dejinta boos yar iyadoo shuruud ku xiray in mar haddii ay diiwaangeliso  hay'adda Barnaamijka Cunnada Adduunka ee UN-ka ay bixin doonto tiro boqoley ah oo ah qayb raashiinkeeda ah. Isla qeybinta koowaad ka dib, iridjoogayaasha ayaa qaatay kala bar wixii la siiyay inkasta oo ay runtii u baahan tahay cunto iyada iyo carruurteeda. Laakiin waxba ma aysan sheegin maadaama ay aragtay deriskeeda oo xoog looga saarayo iyada iyo lix carruur ah qori caaradii sababa la xiriira diidmo inay bixiso qayb  ka mid ah raashinkeeda.

.

---



Ibraahim waa 50 jir, waa aabo leh 20 carruur ah (12 wiil iyo 8 gabdhood) iyo laba xaas. Waxay degan yihiin xero barakac oo ku taal magaalo caasimad ah. Wuxuu beer yar ku leeyahay xarunta barakacayaasha halkaas oo uu ku soo saaro galley wuxuuna ku tiirsan yahay roobka haday biyo noqoto. Inta lagu jiro xilliga qalalan, wuxuu joogaa gurigiisa maaddaama uusan haysan shaqo joogto ah. Wuxuu ku tiirsan yahay hay'adaha samafalka si ay u taageeraan iyo sidoo kale beertiisa xilliyada roobka. Xilli roobaadka, carruurta qoyska qaarkood ayaa qoyskooda ku caawiyaan beerta halkii ay dugsiga ka aadi lahaayeen .

---



Cabdullaahi waa xaasle wuxuuna aabe u yahay 9 carruur ah - 1 gabar iyo 8 wiil. Waxay ku nool yihiin goob barakacayaal. Wuxuu u shaqeeyaa sidii xamaali oo qabta shaqooyin maalinle ah oo u qabto beeralayda bulshada martida loo yahay ee leh dhulka iyo mashiinada. Xaqiisa laguma siiyo lacag ahaan laakiin goosashada ayaa waxaa qaybsadaa isaga iyo beeraleyda marka dalagga la goynayo. Sidaa darteed, kaalmadiisa waxay kuxirantahay wax soo saarka beeraha. Arimaha amniga ee xerada ayaa saameyn taban ku leh ganacsiga halkaasoo xaaskiisa ay ku iibinayso qeyb ka mid ah wax soo saarkiisa uu qaybta u helay, gaar ahaan marka ay habeen galo. Xatooyada ayaa ku baahday xerada .

---



Mariama waa 65 jir. Waxay ku nooleyd xero barakacayaal tan iyo sanadkii 2016 markii iyada iyo qoyskeeda ay ka soo qaxeen dagaalada ka socda gobolka dariska la ah. Waxay la wadaagtay guri ka kooban laba qol gabadheeda iyo lix caruur oo ay ayeeyo u tahay oo da'doodu u dhexeyso 4 ilaa 12 sano. Dhawaan daad ayaa ku dhuftay xerada qoyskiina wax walba waa ka lumeen: guri ilaa cunno, dhar, iyo alaabo kale. Iyada iyo qoyskeeduba waxay heleen qaybinta deg-degga ah. Waxay ku hoos noolaayeen baco bilooyin. Waxay ka baqeysaa in qof jeexjeexo ama tifo bacda, taasoo ka dhigeysa qoysaska kuwo u nugul tuugnimo ama usoo dhac sida ku dhacday deriskeeda. Caruurta ay ayeeyada u tahay dhamaantood ma bartaan iskuulka sababta oo ah ma awoodaan qarashka iyo luuqadda halkaas looga hadlo oo ayna fahmeynin. Had iyo jeer waxay maciinsadaan dawarsi.

---



Faadumo, waa hooyo haysata 4 caruur ah oo da, doodu gaartay heer iskuulka, waxaa soo barakiciyay abaar waxayna ku nooshahay xero 3 sano. Ma jiraan fursado shaqo. Islamarkaana tan iyo abaarihii waxay wax walba ku iibsaneysay deen, inbadan oo ka mid ah waratada ayaa si deg deg ah ugu ogolaaday inay ku iibsato cunto qiimo sareeya. Waxay ahayd qof quus ah sidaa darteed way aqbashay. Waxay ku tiirsan tahay shaqada gacanta waxayna ku maqantahay maalintii oo dhan shaqo nadiifin ah. Waa shaqo adag oo macaashkeedana aad u liito. Waxay ka walwalsan tahay caruurteeda yar yar ee aan si fiican loo daryeelin maalintii. Caruurtu waxay tagaan iskuulka, laakiin labiskooda labiska ardada kale ee iskuulka ayaa ka qaalsan, waxayna dareemayaan in la soocayo. Iyadu ma awoodo inay quudiso iyaga saddex jeer maalintii.

---



Zahra oo ah hooyo 40 jir ah oo leh shan caruur ah ayaa si xoog ah looga saaray booki ay deganayd seddex jeer hal sano gudaheed. Hadda waxay ku nooshahay xero go'doon ah. Qoysku ma haystaan baco ay ku dhistaan guri ku meel gaar ah. Roob baa da'aya mana haystaan bustayaal ay isku kululeeyaan. Waxay nolol maalmeed ka dhigan jirtay iyadoo dharka u dhaqda dadka magaalada ku nool, laakiin tan iyo markii cudurka corona uu billowday, dadku way baqayaan; ma ogola in Barakacayaasha ay galaan guryahooda. Hadda waa inay deensataa lacag si ay xitaa u iibsato biyo iyo cunto. Waxay isku dayday inay shaqo hesho laakiin kalsooni darro badan ayaa ka dhex jirta dadka. Si laguu shaqaaleeyo waa in lagu yaqaan ama aad leedahay dammaanad kaa caawin kara haddii dhibaato dhacdo..

---



Aamina, oo 60 jir ah, waxay ku nooleyd mundul la yara hagaajiyey oo ku meel agar ah oo ku yaal xero degsiimooyin oo un iskaa u bilaabmay tan iyo marki ay ka soo laabatay Dhadhaab, Kenya, 18 bilood ka hor. Cudurka faafa ee 'Covid 19' ayaa xerada ku faafiyey welwel halkaas oo dadka deegaanka loo sheegay inay gacmahooda dhaqaan oo ay ilaaliyaan nadaafada wanaagsan wallow goobahya

biyaha, saabuunta iyo jeelka bakteeriyada looga hortago aanba la heli karin. Dhaqaala la'aanteedu waxay ka hor istaageysaa inay raadiso daryeel caafimaad iyo inay iibsato ilaalin, sida wejisaabka ama masaxaad gacmeedka aalkolada ku salaysan. Waqtigeeda intiisa badan waxay ku bixisaa baryada in viruska uusan soo gaarin xeradeeda. Helitaanka biyo nadiif ah oo gacmaha lagu maydho xitaa lafteeda waa halgan; 20 litir oo biyo nadiif ah ayaa lagu iibiyaa ku dhowaad nus doollarka mareykanka ah, dadka iyadoo kale ah, oo aan haysan shaqooyin rasmi ah ama il dhaqaale oo fiican, ma haystaan raaxo ay biyaha ku iibsadaan gacmahana ku dhaqaan, sidaa darteed inta badan way iska yaraysaa isticmaalkooda.

---



Bashiir wuxuu la nool yahay qoyskiisa oo ka kooban shan carruur ah agagaarka xerada Dadka Gudaha Ku Barokacay. Dhawaan wuxuu helay shaqo xoogaa xasilloon oo xagga dhismaha ah oo uu ugu mahadcelinayo saaxiibkiis oo kula taliyay, xaaskiisuna waxay ku iibisaa cunto dukaan ku dhegan gurigooda. Ganacsigeedu wuu korayaa. Caruurtoodu waxay bartaan iskuulka xaafada. Bashiir iyo xaaskiisa ayaa dhawaan lacag ku qarash gareeyay waxyaabaha amaanka sida nalka, albaab iyo qufulada maadaama ay dareemeen qatar cusub oo dhanka amaanka ah oo ku saabsan xerooyiinka barakacayaasha oo sii kordhaya. Sidoo kale, Bashiir wuxuu ka cabanayaa cuduro ka dilaacay xerada barakacayaasha ee deriska ah iyo cadaadiska awoodaha xarumaha caafimaadka oo badanaa ciriiri ah.

---



Xasan waa Itoobiyaan 16 jir ah. Hooyadii way dhimatay walaalihiisna guriga way ka baxeen. Aabihiis ayaa bilaabay inuu si joogto ah u garaaco. Waxba uma tarin in haweeneyda cusub ee uu guursaday aysan jecleen isaga. Wuxuu go aansaday inuu ka cararo gurigiisa, laakiin ma aanan aqoon meel aan aado. Maalin maalmaha ka mid ah, wuxuu la hadlay dadka ku nool tuuladiisa oo ay u sheegeen inay u safrayaan Boosaaso maxaa yeelay waxay rabaan inay u sii gudbaan Yemen, oo ah meel ay ka taajiri doonaan. Toddobaad kadib, aabihiis ayaa garaacay markale wuxuuna qaaday wadada aada magaalada Boosaaso. Markuu halkaa gaadhay, ma uu helin cid uu garanayo laakiin wuxuu la kulmay wiilal kale oo ay isku fac yihiin. Hadda way wada joogaan maxaa yeelay waxay ka dhigeysaa inay dareemaan badbaado. Maalintii wuxuu ka shaqeeyaa suuqa si uu lacag uga helo si uu cunto ugu iibsado. Habeenkii dhammaantood waxay seexdaan dhisme burburay oo hawada u furan, maxaa yeelay ma awoodaan inay ku seexdaan makhaayada yar ee u dhow. Waa inay lacag bixiyaan haddii ay doonayaan inay isticmaalaan musqulaha. Runtii ma garanayo waxa uu sameyn doono ee xiga, maadaama uusan heysan lacag uu ugu sii gudbo Yemen.



Abdirahim waa wiil 9 jir ah. Qoyskiisa waxaa barakiciyey abaar. Waxay jeclaan lahaayeen inay ku noqdaan tuuladooda laakiin suurtagal maaha isbadalka cimilada darteed. Cabdiraxiim wuxuu la nool yahay aabihiis iyo saddex carruur ah oo ay walaalo yihiin xero aan rasmi ahayn oo ay ku jiraan barakacayaasha. Toddobaad ka hor, aqalkiisa, dhammaan alaabtiisii, oo ay ku jiraan laba buug oo iskuul ah oo ay siisay NGO iyo sidoo kale iskuulkii uu tagi jiray ayaa waxaa hortiisa ku burburiyey rag hubaysan iyo cagaf-cagafyo. Waxay noqotay inay baxaan oo ay gabaad

ka dhigtaan fasalka oo dugsi ku yaal xero kale oo barokacayaal ah. Shalay ayaa loo sheegay inaysan sii joogi karin halkaas xalayna waxay seexdeen banaanka, oo u dhow xerada barakacayaasha. Aabihiis maalintii oo dhan wuu maqan yahay isagoo isku dayaya inuu shaqo helo oo keligiis ayuu ku meeraystaa magaalada, isagoo ka codsanaya inuu caawiyo aabihiis. Wuxuu jeclaan lahaa inuu ku laabto iskuulka si uu u noqdo naqshadeeye.

---



Maxamed waa milkiilaha dhul halkaas oo ay ka sameesmatay degsiimo xero barakacayaal si iskeed ah 12 sano ka hor. Isaga iyo qoyskiisa ballaaran waxay u shaqeeyaan sida "iridjooge" goob xarun ku taala barakacayaasha waxayna lacag ka helaan adeegyada ay siiyaan dadka barakacayaasha ah maalin kasta, iyagoo leexsanaya gargaarka ka hor inta aysan gaarin dadka loogu talagalay ama iyagoo si toos ah uga lacag ogu qaadaan dadka adeegyada la bixiyo. Waxay sidoo kale hubiyaan in bulshada martida loo yahay, ee ay ka tirsan yihiin, ay xiriir wanaagsan la yeeshaan barokacayaasha ayna ka faa'iideystaan joogitaanka barakacayaasha.

---